Qodobka 16aad
MAXAABIISTA UU KU HAYO XABSIGA SARKAALKA MADAXDA AHI.

1. Maxbuus kasta oo ku jira Xabsi, wuxuu hoos imanayaa Haynta & Ilaalinta Sharciga ah ee Sarkaalka Madaxda ah.
2. Maxbuus kasta, ha laga qaado Xabsi ama ha laga keeno Xabsi kale ama ha ka shaqaynaayo Dibada ama ha ku Dhex jiro Xabsiga, wuxuu hoos imanayaa Haynta Ilaalinta Sharciga ah ee Sarkaalka Madaxda ah ee Xabsiga, iyo Xubinta Ilaalada ah (ESCORT), ee ka Shaqaynaysa Xabsiga.
3. Maxaabiista oo dhan, inta ay ku jiraan Xabsi ilaa Xabsi waa in la Ilaaliyaa, Hawlaha Ilaalada,waxaa lagu Maamulayaa Amaradda Joogtada ah.

Qodobka 17aad
MAXAABIISTA LAGU HAYO SHURUUCDA WAAFAQSAN WAARANKA MAXKAMADAHA & AMARADA HAYNTA.

Si Waafaqsan Sharciga, Sarkaal kasta oo Madax ah waa in uu Qabtaa oo ku hayaa Xabsiga Maxaabiista lagu keenay Waaranka & Amaradda Haynta, ee ay soo Qoreen Madaxda awooda u lihi, ilaa Qofkaas si Sharciga Waafaqsan lagu sii daynayo.

Qodobka 18aad
HORGAYNTA MAXAABIISTA MAXKAMADA HORTEEDA.

Amar kasta oo la keeno, ee codsi qoraal ah oo loogu yeedhaayo Maxbuus, ayna soo qortay Maxkamadu ama Madaxda awooda u leh, waa in la horgeeyaa Maxbuuska Maxkamada.
Qoraalku waa in uu toos ugu socdaa Sarkaalka Madaxda u ah Xabsiga.

Qodobka 19aad
BAADHISTA MAXAABIISTA.

Maxbuuska waa la Baadhayaa marka uu soo galaayo Xabsiga & Wakhti kasta oo Sarkaalka Madaxda ahi u arko Lagama-maarmaan, Maxbuuska waxaa Baadhaya Xubin la Jinsi ah Waxaana Maxbuuska laga Qaadayaa Alaabta Mamnuuca ah.

Qodobka 20aad
LACAGTA & WAXYAABAHA KALE UU LEEYAHAY MAXBUUSKU AYNA WAAJIB TAHAY IN SARKAALKA MADAXDA AHI XAFIDO.

1. Lacag oo dhan, dhar & Waxyaabaha kale oo uu leeyahay Maxbuusku, oo aan Maxbuuska loo ogolayn in uu Qaato inta uu Xidhan yahay, waa in uu Xafidaa Sarkaalka Madaxda ahi, isaga oo ku qoraaya Diiwaanka loogu talo galay, lagana Saxeexaayo Maxbuuska.Dhamaan alaabtaas & Lacagtaaba, waa in loo Celiyaa Maxbuuska marka Xabsiga laga sii daayo.

   Hadii Maxabuusku waydiisto, in Sarkaalka Madaxda ahi ogolaado, waxaa loo diri karaa alaabtaas ama Lacagta uu leeyahay Maxbuusku Qaraabadiisa ama Saaxiibadii.

2. Markii uu huga Maxbuusku Calal noqdo ama ay adagtahay Nadaafadiisu, lagana baqo in uu Sababo Cuduro, Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu amrayaa, in laga Baabiiyo Dharkaas Xaladaas. Marka Maxbuuska laga siidaayo Xabsiga waxaa la siinayaa dhar, waxaana laga bixinayaa khasnada Dawladda.

WAAXDA LABAAD.
KALA SAARISTA MAXAABIISTA.
Qodobka 21aad
GUDIDA SOO DHAWAYNTA.

Xabsi kasta waa in uu leeyahay Gudida soo dhawaynta, oo ka kooban Sarkaal Madax ah & Xubno kale oo Sarkaalku Magacaabay, iyaga oo isla markiiba Su'aalo Waydiinaya Maxbuuska, Su'aalahaasi waxay la Xidhiidhaan Da'diisa, Dabeecadihiisa, & Taariikhdiisa, kala saaridda & Tababarka Dhaqan Celinta Maxbuuska.

Qodobka 22aad
U KALA SAARISTA MAXAABIISTA
RAG & DUMAR.

1. Raga & Haweenka Maxaabiista ah waa in la kala soocaa, oo lagu hayaa Meelo kala duwan oo Xabsiga ah, waxaana loo diidayaa in ay is arkaan ama ay isu tagaan.
2. Xabsi kasta oo ay ku Xidhan yihiin Haween Maxaabiis ahi, waa in laga helaa Xubin Ciidan ah oo Haween ah, oo Danaysa ama Kormeerta, kana Masuul ah Anshaxooda.

Qodobka 23aad
U KALA SAARISTA MAXAABIISTA
QAYBO.

Si loo fududeeyo Tababarkooda ama loo yareeyo khatartooda, Qayb kasta oo ka mid ah Qaybahan soo socda ee Maxaabiista, waxaa loo kala duwayaa go'gosha, qaybkasta waxaa laga saarayaa qaybta kale:-

a) Caruurta waxaa laga saarayaa dhalin yarada & kuwa Waawayn.
b) Kuwa aan dembiga gelin waxaa laga soocayaa kuwa dembiga ku soo noq-noqda & Caadaystayaasha.
c) Maxaabiista Garsugayaasha ah & kuwa sugaaya dhagaysiga Dacwadda waxaa laga soocayaa, kuwa la Xukumay.
d) Kala qaybinta kale, Wakhti ilaa Wakhti waxaa samaynkara Sarkaalka Madaxda ah.

Qodobka 24aad
HABKA KALA HOR MARINTA.

Dhammaan Maxaabiista Xukuman, waa in haddii ay Suurogal tahay ay ku Shaqeeyaan si waafaqasan Go'aanka Xukuumadda iyada oo la Raacaayo habka kala horaynta loo lagu sheegay Xeer-Nidaamiyaha.

WAAXDA SADDEXAAD
SHAQADA MAXAABIISTA
Qodobka 25aad
SHAQADDA MAXAABIISTA

Dhammaan Maxaabiista Xukuman waa inay ka Shaqeeyaan Gudaha ama Dibadda Xabsi kasta oo Jamhuuriyadda ku yaal & Shaqo kasta oo Sarkaal Madax ahi u Diro haddii aan dhakhtarku ka reebin:-

Waxaanay u Shaqayn Karaan Sidan:

a) Haweenka Maxaabiista ahi waxay ka Shaqaynayaan Gudaha Xabsiga oo kaliya, waana in ay qabtaan shaqo ku haboon shaqadooda ama Dabeecadooda.

b) Carruurtu waxay ku shaqaynayaan shaqo la xidhiidhka wax barasho ama dhaqan celin.

c) Maxaabiista kale ee aan Xukunayni waxay ka shaqaynayaan qolalkooda, farshaxanka, dhar samaynta & Nadiifinta, Shaqooyinka kale ee ay ka haboon yihiin waxaa qabanaaya kuwa Dalbada.

Qodobka 26aad
ABAAL GUDKA SHAQADA MAXAABIISTA.

Maxaabiista Dunuubta ku xukuman, xukun xabsiyeed oo shaqo Weheliso, haddii loo diro Shaqooyin Habaysan, waxaa la siinayaa Abaal gud la xidhiidha shaqada ay qabteen, iyadoo la raacaayo Xeer-Nidaamiyaha.

WAAXDA AFRAAD.
BAAHIDA MAXAABIISTA
Qodobka 27aad
CUNTADA MAXAABIISTA.

1. maxbuus kasta waa in uuu helaa Cunto ku filan oo isku dheeli tiran,waxaana lagu qeexi doonaa Xeer-nidaamiyaha, Maxbuuska waxaa loo fasixi karaa in uu Cunto gaar ah dibadda ka helo, iyada oo la raacayo Saacadaha & Siyaabaha uu u amro Taliyuhu.
2. Arimaha gaarka ah waa in la hayaa Nooca Cuntada ee Maxbuuska, iyada oo la tixgelinaayo habka & heerka nolosha ama nooca Cuntada uu Caadaystay.

Qodobka 28aad
DHARKA MAXAABIISTA.

1. Maxbuus kasta oo dambi ku xukuman waa in la siiyaa huga Xabsiga,oo lagu qeexi doono Xeer-nidaamiyaha, dharkale waa lagu siin karaa qoraalka dhakhtarka ama amarka Sarkaalka Madaxda ah, wuxuuna ku Cadaynayaa Sababta uu ugu fasaxay dhakhtarku.
2. Hadii Maxbuus kale oo aan ahayn kuwa dambi ku Xukuman, uuna dhar haysan ama Sarkaalka Madaxda ahi uu arko inuuna dhar ku filan haysan, Maxbuuskaas waxaa la Siinayaa Huga Xabsiga.

Qodobka 29aad
JIIFKA MAXAABIISTA.

1. Maxbuus kastaa waa in uu helaa go'gol, sida lagu faah-faahin doono Xeer-nidaamiyaha.
2. Go'gol gaar ah waxaa bixin kara dhakhtarka.

WAAXDA DHANAAD.
CAAFIMAADKA MAXAABIISTA.
Qodobka 30aad
BUKAAN SOCOD EEGTOOYINKA XABSIGA.

Xabsi kastaa sida ugu suurto galsan, waa in uu leeyahay Bukaan socod eegto ama meel dhakhtar ku eego bukaanka Maxaabiista, Xabsiga ama meelaha dhaqan Celinta.

Qodobka 31aad
DHAKHTARKA.

Sida ugu suurto galsan, waa in loogu sameeyaa dhakhtar, Xabsi kasta iyo meelaha dhaqan celinta, dhakhatar eega bukaanka iyo Caafimaadka Maxaabiista iyo daawayntooda.
Haddii kale dhakhtarka ugu dhaw xabsiga, waa in uu eegaa Maxaabiista si joogto ah waana in uu masuul ka noqdaa arrimaha Caafimaadka iyo daawaynta Maxaabiista.

WAAXDA LIXAAD.
WAXBARASHADA & XIDHIIDHKA IJTIMAACIGA AH.
Qodobka 32aad
WAXBARASHADDA MAXAABIISTA.

1. Sarkaalka madaxda ahi waa in uu qaadaa Talaabo kasta oo uu ku suuro galinaayo, in uu hubiyo fasalo ay wax ku bartaan Maxaabiistu & in uu u fasaxo wakhti haboon in ay wax bartaan ama wax Sawiraan (HANDICRAFTS) ama farshaxan sameeyaan, waxaa fiiro gaar ah la siinayaa waxbarashadda Ganacsiga la xidhiidha oo ay Maxaabiistu ku shaqaysan karaan.
2. Wasiirku wuxuu magacaabi karaa wadaado & sarkaal hanuunineed oo arrimaha Diinta ku wacdiya Maxaabiista, waxaana la siin karaa abaal gud lagu sheegi doono Xeer-nidaamiyaha.
3. Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu soo diyaarin karaa markay suuro gal tahay khudbad.

Qodobka 33aad
MAXAABIISTU XIDHIIDHKA AY LA LEEYIHIIN QOYSASKOODA.

1. Sarkaalka Madaxda ahi waa in fiiro gaar ah siiyaa, xidhiidhka ka dhexeeya Maxbuuska & Eheladiisa, si loo hagaajiyo danahooda.
2. Waa in lagu dhiiri geliyaa Maxbuuska in uu xidhiidh la yeesho eheladiisa & Qoyskiisa, si ay uga qayb-qaataan dhaqan Celintiisa.